



WAAXDA XAAFADAHA SEATTLE

Waaxda Xaafadaha “Seattle Department of Neighborhoods (DoN)” waxay siisaa khayraad iyo fursado dadka deggan Seattle si ay u dhisaan bulshooyin adag una hagaajiyaan tayada nolosha bulshadooda. Iyada oo magaaladu leedahay in ka badan 180 xaafadood, waaxdu waxay ka ciyaartaa door muhiim ah kobcinta jiritaanka dareenka ahaanshaha iyo dhisitaanka xidhiidh adag oo ka dhexeeya bulshooyinka iyo dawladda hoose.

DoN waa ... *isku-xidhka dadka, bulshooyinka, iyo dawladda.*

ISKU-XIDHKA DADKA

Maalgelinta La Leekaysiiyop ee Xaafadda “[Neighborhood Matching Fund](#)” waxay siisaa lacag kooxaha degaanka mashaariic door ah oo xaafadda lagu horumarinayo, abaabulayo ama qorshaynayo. Dadka xaafadda ee hela lacagta Neighborhood Matching Fund waxay ku daraan intaas in le’eg oo lacag ah, tabaruc iyo/ama alaab iyo adeegyo deeq ah.

Barnaamijka Jardiinooyinka Bulshada ee “[P-Patch Community Gardens Program](#)” wuxu taageeraa oo kobciyaa wax beeritaanka magalada gudaheeda eek u salaysan waxyaabaha orgaanigga ah iyo fursadaha kale ee cagaaraynta ee ku habboon dhaqanka iyo xafadda. Waa barnaamijka wax beeritaanka bulsho ee ay maamusho dawladda hoose ee ugu weyn dalka, oo lagu maamulo ilaa 70 beerood oo u adeega 2000 guri. Beeraha bulshooyinka, barnaamijyadooda jiidaha wax beeritaanka dhalinta, beeraha suuqa, iyo siyaasadda cuntada waxay u adeegaan dhammaan muwaadiniinta Seattle iyada ahmiyad gaar ah u leh saboolka iyo dadyowga muhaajiriinta ah iyo dhalinta.

ISKU-XIDHKA BULSHOYINKA

Isuduwayaasha Degmada Xaafadda “[Neighborhood District Coordinators](#)” waxay fudaydiyaan oo isku-xidhaan xaafadaha iyo dawladda. Iyaga oo xafiiskoodu yahay Xarumaha Adeegga Xaafadda, Isuduwayaashu waxay ku xidhmaan daraasiin ururo bulsho ah oo ka kooban maashaariic xaafadeed oo kala duwan oo ay kala shaqeeyaan ka hawlgelinta iyo taageerada dhammaan muwaadiniinta degmooyinkooda.

Unugga Qorshaynta Xaafadda “[Neighborhood Planning Outreach](#)” waxay si dhaw ula shaqaysaa xaafadda iyo dawladda magaalada si loo hubiyo in qorshihii korriinka xaafadda ee dadka degaanku dhigeen horrantii 1990-maadhii haddii ay meelmareen muddadii hirgelinta ee 20ka sanno ahayd. Waxa dheer waxay la shaqeeyaan xaafado gaar ah, oo ay ka socdaan isbedelo weyn, oo ay cusboonaysiinaan qorshayaashooda iyaga oo u maraya qaab gacanfidin ra’yi wadada leh bulshooyinka laga tiro badan yahay oo ay ku jiraan muhaajiriinta iyo qaxootiga.

Barnaamijka Muhaajiriinta iyo Qaxootiga “[Immigrant and Refugee Initiative](#)” wuxu taageeraa oo kobciyaa kaqaygalka firfircoon ee degmada dadyowgooda muhaajiriinta iyo qaxootiga ah si loo siiyo cod iyo isku-xidh dawladda magaalada ah. Waaxdu waxay ahmiyad siisaa hagaajinta adeegyada afcelinta iyo tarjumadda, taageerada farsamo ee ganacsiyada ay leeyihiin muhaajiriintu, kordhinta helitaanka deeqaha magaaladda, iyo shaqaalaynta guddi ka talisa ahmiyad-siinta arrimaha muhaajiriinta iyo qaxootiga.

ISKU-XIDHKA DAWLADDA

Xarumaha Adeegga Xaafadda “[Neighborhood Service Centers](#)” waxay ku yaalaan mid kasta oo ka mid ah 13 ka degmo ee magaalada oo ay u shaqeeyaan sida ‘xafiiska magaalada laga xukumo oo yar.’ Xarun kasta waxay haysaa macluumaadka adeegyada magaalada iyo wakaaladaha adeegga dadka, barnaamijyada iyo hawlaha xaafadda.

Adeegyada Macluumaadka iyo Lacag-bixinta Xaafadda “[Neighborhood Payment and Information Services](#)”:
Toodobo ka mid ah 13 ka Xarumaha Adeegga xaafadda, wakiilada adeega macmiilka ayaa gargaara in ka badan 225,000 qof sannad kasta oo dalbada baasabooro, bixinta biilasha dabka/biyaha iwm., helitaanka ruqsadaha xayawaanka carbiska ah iyo bas-baasyada lagu fuulo baska, iyo helitaanka foomka iyo xaashiyaha daruuriga ah ee magaalada.

Barnaamijka Kaydinta Taariikhda “[Historic Preservation Program](#)” waxay habaysaa magacaabista iyo ilaalinta in ka badan 400 oo dhismayaal taariikhi ah, buqcado, walxo iyo doonyo, iyo weliba toddobo degmo oo taariikhi ah daafaha Seattle. Barnaamijku wuxu bixiyaa macluumaadka aasaasiga ah ee kaydinta taariikhda ee Seattle, oo ay ka mid tahay habka u-qoondaynta, iyo gunno la siiyo hantiilayaasha si loo dhiirigeliyo kaydinta iyo dib-u-cusboonaysiinta. Waxa kale oo ay taageertaa shaqada dhawr guddi muwaadiun oo ku hawlan kaydintaa taariikhda.

Barnaamijka Hay’adaha Waaweyn iyo Dugsiyada “[Major Institutions and Schools Program](#)” waxay bixisaa qaab ay hay’adaha waaweyn ee xaafadaha Seattle (sida cisbitaalada, dugsiyada, jaamicadaha, kulliyadaha) ay si toos ah ugu hawlgeli lahaayeen kobcinta qorshaha ee hay’adahaas si danaha xaafadda loo tixgeliyo. Barnaamijku wuxu abaabulaa oo shaqaaleeyaa guddiyo talo-bixineed oo ah muwaadiniin magaalado u magacawday mashruuc kasta.

Haddii aad rabto adeeg turjubaan, wac
(206) 684-0464, u sheeg jawaabaha afkaaga oo
waxa lagugu xidhi turjubaan.